# Sahankii Richard Burton ee Bariga Afrika
# Cutubkii 7baad
# Bancawseedka Maraar ilaa Harar

**Tarjume & Tifatitre Boodhari Warsame**

**Julay 14, 2016**

---

Subaxii Deseembar 23 ahayd, ayaan hiirtii hore kulminnay safarkii loogu talo galay in uu Maraar naga gudbiyo. Dhulkan dhexyaalka ah ayaa waxaa ku kulma Ciise, Bartire iyo Habar Awal, si ay safarrayda ugu dhacaan oo ugu bililiqaystaan hantidooda. Soomaalidii argagax ayaa ku dhacay markii ay arkeen qof baxsad ah oo xeradeennii isaga oo *qaawan* ku soo dhex dhacay, ka dib markii uu lafahiisa dirqi ku la soo baxsaday. Ma ahayn safarkayagu mid aan waxba laga dheefayn ee hargo yar iyo tebbedo subag sixin ah oo loo sitay in lagu beddasho Haruurka beeralayda Geri ayaa raran. Sidaa oo ay tahay, waxa ugu yar ee burcaddaasi ay dheef bidaan si kal iyo laab ah ayay u marooqsadaan. Hantidayadu waxay ka koobnayd afar ama shan rati oo beer laalan, qiyaas ahaan 50 dameer oo dhegaha laga suntay iyo wehelka aan waligood laga ag waayin carriga Soomaaliyeed, waa dumar sirqo ah e. Habraha waxay u muuqatay in lagu xusho da', foolxumo iyo xoog. Maalintii oo dhan ayay ilmahoodii oo ay dhuugag ku xambaarsanyihiin dhabarka ku sidaan, isla markaana qaadaan alaabooyin culculus, iyaga oo aan waxba daal ahi ka muuqan. Waxaa kuwaa ka mid ahaa badwiyad laga dhintay oo lagu garanayay ”Weerka”[1] cad, waa falliiq mayrax ah oo gambadeeda xayrta leh lagu dul xiro.



Waxaa iyaguna na weheliyay saddex wadaad oo qalabkoodii u dhanyahay iyo xertoodii aalaaba daallanayd. Qur’aanka ayay afka ku hayaan, mar walbana Faataxada in la maro ayay soo jeediyaan. Magaca Alle si joogto ayaa uu bushimahooda uga qoyanaa, waxayna xammaasad waalli ku dhow ku falanqaynayeen mas’alooyin dineed Fiqi la xiriira, sidii Gil Blas[2] iyo saaxiibbadii. Midkood waxaa looga dambeeyay ‘Faalka’ ama tafaafulka, wehelladayda oo si joogto ah ula tashanayayna wuxuu ogaysiiyay in saxar aan duurjoog

---

[1] Weerka ama hu'ga asayda. – *[T]*

[2] Gil Blas waa qareen (character) hormuud ka ah buug sheekaxariiro ah oo uu qoray qoraagii Faransiiska ahaa ee Alain Ren Lasage intii u dhexaysay 1715 ilaa 1735. Gil Blas sheekadaan wuxuu ka dhiganyahay nin cayr iyo nolol adag ku soo koray horraantiisii oo markii dambe inta bowsi iyo u kuurgal dheer wax ku bartay heer uu noloshiisa kula soo baxo ka gaaray. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

ahayn ayan ka baqin. Saadaasha wuu haleelay. Aan se raacsho e,  la iima sheegin ilaa ay dhabowday. Abbaaraha12:30 duhurnimo ayaannu sadcaalkayagi ka bilownay dhul adag oo taag ah, iskujir geedqodxeed iyo durdurro ah, oo markaa ku soo dhacnay warraq bagaag dhagaxa ah oo laba teed oo buuro ah u dhaxeeya. Midigtayada waxaa ku yiil fiiq dhuuban oo dusheeda burbur guryaad ku yiil. Abtidoon, igaar Gadabuursi reer miyi ah oo seesidda baqalladeenna loo shaqaaleeyay, waxa uu sheegay in halkan uu ku aasanyahay waligii Sheekh Samawai [Samawacad]. Waayadii hore laasas dhawr ah ayaa ku yiil bannaanistaa kuraha u dhexaysa,  waxa ay se la libdheen kuwii ka cabbi jiray.

Mugga waxaannu soo galnay Bancawseedka Maraar, mid ka ka mid ah jiidaha dhaadheer ee bananka dhulka Soomaaliyeed isku dhafan. Ballacu waa qiyaastii 27 mayl, xagga bariga waxaa ka soo xeera dhulkii labarogmayay ee aannu soo marnay, xagga galbeedna Gurays, silsilad fiiqaq ah oo buuralayda Harar ka soo farcanta. Guud ahaan,  kalashubku waa waqooyi iyo koofur. Jihada hore waxaa dega Ciise, tan dambena waxaa laga arki karaa figaha Qadaw iyo  Madar oo ay  degaan qolooyinka Habar Awal. Silsiladahaasi waxaa la ii sheegay in ay dhereranyihiin ilaa carri Ogaadeen. Sagxadda dhulku waa dhul wanaagsan; carro madow iyo godad bahallo yar yari ka buuxaan. Waa dhul kan ugu soo waxsoosaar badan  noqon karay, ciidqaadka korena waxaa fidsan caws dhaadheer oo cadceedi togtay oo aan kala go’ lahayn ilaa marka meel looga jeedo la moodo gaska velvet[3] hurdi ah. Waadiyada is dabayaal ee qaada biyaha ka soo rogma roobka kuraha ku hoora waxaa ka baxa geedgaab iyo geedqodaxeed garabka isku haya, cawskuna si caalwaa leh  ayuu u cagaaranyahay. Sidaa oo ay tahay, dhulku waa ciiddaa rogan oommane ah. Biyo iyo xaabo waa ka dhif meel buuraha xoogaa u jidha, badwida kuwooda ugu dhiirranina ku ma dhacaan in ay u babacdhigaan khatarta kooxaha burcadda ah, kulaylka milicda maalmeed ee daran iyo qabowga lafajabiska ah ee habeen. Si ay ahaato ba,  banka daafihiisa ayaa waxaa ka sii muuqday raadadkii jabaddo laga guuray oo is dabayaal.

Duhurka markii ay la sinnayd ayaannu ka gudubnay godeenkii dhexe, halkaa oo aan qurac xabagti kaga qadaynnay, raxanno ugaar ahina geedaha harsanayeen. Waxaan ku dadaalay in aan Siigga saynta cad iyo Biciid ciideedka waawayn toogto. Ha se yeeshee, yabaqa safarrayda ayaa  ii qoonsaday.

Wax yar ka dib, waaannu ku nimi jibaallo haruur iski uga baxay xabbado socoto ka qubtay. Kani waa aragtidii ishaydu ku diirsatay badar ee iigu horraysay ilaa waagii aan Bombay ka imid: carriga qabriga Gacankudhiiglihii ugu horreeyay waligiiba Triptolemus falasho waa uu ka caagganaa, Saylacna iyadu waa ba sallax ciid ah oo aan wax ka bixin[4]. Weheliyeyaashaydii si boob ah ayay u amaayuugeen dhuuxa “qasab” Afrikaaneedkan, in kasta oo lagu yaqaan in uu qandho keeno. Iyagii ayaan ku dayday aniguna, waxaana aan ogaaday in uusan sonkor xun uun waxba  ka yaraysan. Badwiyiintii dameerahoodi caddaysinka ahaa ayay waxay ku rarteen bocorka kharaar ee Ubbada la yiraahdo oo xagga kore qare uga eg. Marka la qaabeeyo, la qallajiyo oo la deebiyana waxay noqotaa sida dhiil Soomaalida iyo agab reer magaal. Gabbaldhacii, markii ay qorraxdu aayar buuraha galbeedka fog ah dabadooda baalka dhigatay ayuu Bancawseedkii

---

[3] Maro gas jilicsan taabashadana aad ugu macaan oo xariir, layloon, suuf  iwm ka samaysan. – *[T]*

[4] Gacankudhiiglihii ugu horreeyay waa Qaabiil oo walaalkii Haabiil dilay. Waxaa la sheegaa in uu ku duuganyahay Jabal Shamsaanka Cadmeed.  – *[B]*

[Triptolemus waxa uu ku jiray sheeko khayaalkii Giriiggii hore, waxaana lagu sheegaa in uu ka dhignaa gacanyare sanamkoodii Demeter (ilaahaddii aaranka) ay dooratay u na soo dirtay in uu dadka beerashada baro. Macnaha guud waa Yaman waligeedba beero naf leh lagu ma ogayn]. –*[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

midabkii hurdiga ifaya ahaa iska rogay oo dahabi cawd basali ifaya ahi dedey oo qurux aan la suurayn karin la soo baxay. Xayawaannadii cidla'da ayaa bilowday in ay soo muuqdaan. Dhagajuun gabbanaya iyo dawaco ido badan baryahood ku naaxday ayaa weheliyeyaashaydii uga dardaar weriyay in habeenkaa subaaca hororka ah la iska jiro. Halkaa war dareen leh ayaa gorodda la is gashaday, waxaana la ii sheegay in dhowaan libaax sagaal dameer safar kala haray. Habeenkii markii uu madoobaaday ayaa qaafiladii badwida oo si fudud u rarnaydi naga hor martay, awrtayadii daallanaydna gadaal fog daba gashay. Dhanka dambe ayaannu soconnay, si aan haraadi uga hortagno, markii si kedis ah ratigii dabaadiga oo ugu dambeeyay uu dareen dhegaha nabtay oo damcay in uu luqunta dadbo. Haddii aan gadaal dhugtay, waxaan gartay hummaagta xayawaan ballaaran oo degdeg sharqan yari leh nala daba socda.

Weheliyeyaashaydii xabbad waa ku ridi waayeen, iyaga oo nin ay moodeen uga baqay. Ugu danbayntii, iyada oo uu dayaxu in shiish saxan la gano uu aad ugu if yaraa ayaa markii xabbad rayfal ay hawada jibaaxay libaax duqoobay dibadda ku dhacay. Argagaxii ammuurtaa laga qaaday habeenkaa maad ayuu isugu dhurtay. Geesigii Buux ahaa, ee sida ka muuqata goobo badan oo la isku galay haaraha ay u yeeleen, inta uu gacmaha kor u tuuray ayuu qaylo waallan "Libaaxa! Libaaxa!" yiri. Habeenkaana wax aan taa ahayn lagama hadal.

Buuraha galbeed ee cirfiidka u eki waxay u muuqdeen in ay sii yaryaraanayeen markii aannu banka siman ee aan dhammaadka lahayn ku sii baxnaba. Markan dhulkii waxa uu noqday daalaadhac aan sinnayn oo kax dhagaxa ah. Baqalihii boholo dhaadheer ayay kufaakaceen, awrtuna dirqi ayay ku luudayeen. Haddii aannu sii soconnay, Wadaaddayadii, masaakiin dheh!, oo maalintii oo dhan haweenku cayrnimadooda ku 'carinayeen' ayaa bilaabay in ay Qur'aanka aad u akhriyaan, si ay mahad uga celiyaan khataro badan oo laga samtabaxay. Haddii habeenkii dumay, waxaa na soo jiitay muuqaal yaab leh. Jiid ballaaran oo belel ifaya ah oo i soo xasuusiyay webigii dabka ahaa ee Hanno[5] ayaa buurta hoos uga hoobatay, sidii ay weheliyeyaashayda la ahaydna waa mid bancawseedka oo dhan khatar gelinayay. Shilalka noocan ahi waa caadi. Qadhaabte ayaa geed sur malab uu ka jabsanayo gubaya, ama meel caws qallalan leh cunno ku dhex karsanaya, dabadeedna dabaysha ayaa qaadda ololka oo uu meel dhow iyo mid dheerba ku faafaa. Markan wax shil ahi ma dhicin. Hase ahaatee, buuruha ayaa laba maalmood sidii Solfatara[6] u qiiqaabayay.

Abbaarihii saddex saac oo habeennimo ayaannu dhawaq maqalnay, waxaana la i faray in aan buntukhayga xabbad ka rido, waa intaa oo xerada nala ku oodaaye. Waqti ku habboon ayaannu ku gaarnay degmo safaf oodo gaagaaban ah. Waa taxanyihiin, waxayna gaarayeen 60 ilaa 70 goobo loo dhigay, si ay xayndaab u sameeyaan. Maadaama geedqodaxeedku halkan ku yaryahanyna, dhir yar yar ayaa ilaha guryaha u dhaxeeya lagu googooyay. Dadka oo isugu jiray Geri iyo Gadaabursi reer miyi ah ayaa soo xoomay, si ay kuurkooda uga bogtaan, annagase kaftan iyo sheeko dheer nooga ma ay caddayn. Rarkayagii ayaa si dhakhso leh xerada agteedii loo tuumiyay, baqalihii iyo awrtii habeenka ayaa laga dabray, dabadeedna annaga oo aan casho dhadhamin oo dhaxan la qarqarayna ayaannu darmahayagii hoosta ka xaluulannay oo dig niri. Maalintaa, ku dhowaad 15 saacadood ayaannu soo fuushanayn, nasiyadeennuna qiyaastii 30 mayl iyo 240° koofur galbeed ayay Kooraley kaga beegnayd.

[5] Bad mareen Qardaajina (Carthage) u dhashay oo caan ahaa. Qarnigii 5[aad] ayuu xeebta Galbeed ee Afrika shiraac ku maray. Mucjisada 'webiga shidan' waxaa mar dambe la ogaaday in ay ahayd uun dab ka kacay kaynta ku dhereran webiga Gaambiya. *[Tif. GW]*

[6] Hog foolkaane nool ah oo gobolka Naples ee carriga Talyaaniga ku yaal. *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Dibudhac kale iyo dhambaal labaad oo Garaad Aadan loo diray ka dib, duhurradii markii ay ku beegnayd ayaa waxaa soo muuqday mudanaha xaaskiisii lixaad, waa geesiga Buux ah walaashi e. Weheliyeyaashayda oo in haweeni magan geliso iska la waynaay imaatinkeedu xiise uma lahayn. Si ay ahaataba se, 'Dahabo' waxay ugu laabqaboojisay iyada oo noo sheegtay in Garaadku soo diray wiilkiisii waynaa ee Shirwac ahaa oo uu dalmariye ahaan u soo diray. Ugaasaddani waa marwo gypsy u eg, si hilan u labbisan, ilaa 30 jir ah, suure baxsan leh, adaab kalsooni ku dheehantahay leh oo 'fudayd' ku caan baxday. Xishood badani wajigeeda ka ma muuqan markii aan salaamay, hadiyaddii ku habboonayd oo maro cusub oo qurxoon ahaydna farxad sawaxan leh ayay ku guddoontay. Abbaarihii 10 saac oo galabnimo ayuu soo laabtay dhambaalsidahayagii labaad, isaga oo Garaadkii ka sida dhambaal canaan ah oo sababta aannaan si degdeg ah ugu soo gaarin ku saabsan. Wuxuu calaamad daacadnimo u soo dhiibay budhkiisii, ul budh ah oo qiyaastii laba cagood dherer la'eg, mardimo midabbo casaan, madow iyo hurdi is beddelaya, dhakadana lagaga dhejiyay madax sidaa oo kale u samaysan[7].

Waaberigii Diseembar 26 ahayd ayuu Shirwac, dhaxallaha la filayo inuu budhka Garaad Aadan qabto, oo geenyo yar fuushani soo dhigtay. Aabbihi ayaa saddex maalmood ka hor noo soo diray. Ha se ahaatee. Gadaabusriga oo malahana xeradeenna gaar ka hayay ayuu ka baqay inta ay iyaba ka baqaan isaga, ilaa uu hubsaday in ay nabdoontahay si uu soo galo. Si xushmad leh ayaannu u qaabillay, isaguna wuxuu kaga naqay in uusan Buux dib u noqon, ilaa ay balbaladiisa malab ku wada muudsadeen. Geesinnimadii Abbaankaygu hadda waxay noqotay isku daarasho. Xataa Yawmul Qiyaame oo heerkulka geesinnimadiisu ay ilaa muddo hore eber ka hoosasaysay ayay dhacdadu dhiirrigelisay. Wuxuu ku dhuftay, isaga oo aan looga baran goobaha halista ah, baydadkii tixda colyahannada Carbeed marin jireen:

> I have crossed the steed since my eyes saw light,
> I have fronted death till he feared my sight,
> And the cleaving of helm, and the riving of mail
> Were the dreams of my youth,—are my manhood's delight.
>
> [Ilaa indhaygu ilays arkeen sangeha waa kooraysan jiray
> Mawdka qaabilay ilaa u wajigaygaba nacay
> Ama dhambalidda koofiyad dagaalka iyo tartariiqa cambuur bireed
> Ilaa waagaan yaraa waa ku taami jirayoo
> Waa ragannimadayda ku diirsigeed.]

Markii aannu rariddii dhammaynay ayaa baqal koorihi la waayay. Shirwac waxa uu dalbaday in martida aabbihi dhakhso loogu soo celiyo hantidoodii, maxaa yeelay ayuu yiri; alaabta oo dhan hadda Garaadka ayaa leh, annaguna, illeen sina ba uga ma naallee, fal ayaannu degmada ugu hanjabnay. Shaygii waxa laga helay xas aan sidaa u sii fogayn. Tani waxay ahayd xatooyo tii noogu horreeysay noogu na dambeysay ee na loo ku geysto carriga Soomaaliyeed. Dhulalka ilbaxa ah ayaan ku safray, wax badanna waa iiga lumeen.

Markii ay laba saac oo habbeennimo ahayd ayaannu waqooyi-galbeed afka saarnay oo cagta koofureed ee buuraha Gurays raacnay, dhakhsana u soo gaarnay darafta bancawseedka , halkaa oo wadiiqo si fiican cagta loo mariyay na xasuusisay in aannu mar dhow agabarta ka

[7] Ushani waa ul xardhan, muunadaysan oo u gaar ah ragga derajada dadka ku dhex leh, ma aha budhka (garruun) caadiga iyo bakoorad midna. Waa ul dheer, toosan oo halka sare ee la qabsado madax kuusan oo dhinac u jeeda ku leh. *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

dhammaanayno. Lix mayl markii aannu sii maqiiqnayn ayaannu dhanka midig u weecannay, taallo dhagaxyo ah oo geedo barakaysani hareeyeen oo uu Sheekh Cabdilmaalik ku aasanyahayna Faataxo ku sii akhrinnay. Meel meeshaa wax yar ka durugsan waxaa durbaba banka ka soo foocay xayn kaaniyaallo qasriyaysan ah oo ciraanaysi badan oo waalan laga sheego. Safarraydu mar walba hoosteeda ayay ku furtaan, qofkii dusha sare seexdana jinni ayaa ku dhaca. Maalin timaaddadaa ah Harar waa la burburin doonaa, 'Jannah Siri'na waxay noqon doontaa magaallo bullaasha. Dusha ayaannu uga baxnay, wax naflay ah oo aan galayrro, bawne, guumays iyo nooc qurxoon oo gorgor madow ahaynna ugu ma aannaan tegin. Waxaa ku yiil haraadi badan oo guryo burburay iyo ceelal ah, halka dhakada dhinacyadeeda ay ku yaalyaalleen cutubyo geedka Bisiqa la qaddariyo ah. Sidaa aan yeelnay fal caqliyaysan ma ahayn. Badwiyiintii mar uun ayay ku dhawaaqeen in aannu qalcad 'sahansanaynno', warkaa baasna Harar ayuu nooga horreeyay.

Markii aannu mayl ka soconnay Jannah Siri ayaannu xirmo dhul taag sare  ah ka gudubnay. Durbadiiba, sidii sixirkii ayuu muuqaalkii isu beddelay. Hortayada waxaa dhaca Alp[8] yar, waa aagga labaad ee Buuralayda Itoobiya. Hareeraha waxaa ku yiil buuro dhaadheer oo dhagax fiiqan ah, dhinacyadu Saj teak iyo Dayib la madoobaadeen, rakooyinkana teel teel tiin ahi daboolay. Hoosta waxaa mara tog qoto dheer oo dhexdiisa ay qulqusho dulundulco biyo saafi dhalaalaysa ah. Waa muuqaalkii ugu farxadda badnaa ee ilaa hadda aannu aragnay. Hore marka looga sii socdo, gaan buuro ah oo ilaa ilikuwareedhay daliig toosan oo dhul lafcir u eg oo la moodo bad meel dheer ka muuqataa ay hareeraysay ayaa durba dooxooyinka dugsoon ka soo kuday. Gadaashayada oommanihii agabarka  ayaa afka soo kala haya, hadda se waxaannu gaarnay cirifyadii ilbaxnimada, halkaa oo dadku inta xooladhaqashada ka tagaan negaado, beero fasho oo uu nolosha raaxooyinkeeda u jeesto.

Beeruhu waa jaamo degaandegyada buuraha dushooda ama dhinacyada dooxooyinka waran oo ay kala qaybqaybiyaan teedad geed ubax leh ah, wadiiqooyin aan ka duwanayn kuwii miyiga Igland ay u dhexeeyaan. Markii aan u sii dhawaadayna daisy-ga, thistle-ka iyo sweet briar ayaa indhahayga Yurubiga ah u doojiyay. Tuulooyinku negaadi ayay qaayibeen, Aqalkii iyo xeradii waxaa beddelay Gambis ama mundullada gambaleelka u eg ee Afrikada Dhexe. Waa mundullo wareegsan oo bal haruur lagu sarbay, dhoobo adag lagu malaasay, dushu waa gembis caws adag oo dhalo dhuuban loo taagay, figta sarena uu ka muuqdo udubdhexaad qolofta ukun goroyo taaj looga dhigay. Xayndaabyo qodax adag ah ayaa degmooyinkaas oo buuraha dhinacyadooda oo dhan  ka mukaysan ku xeeran. Badankooda waxaa u dhow cutubyo geedo ah, dhinacyada koofureedna waxaa sidii buulal shimbireed ka lusha dhulubooyin dhaadheer oo dermo ah, waa gaaguurta gobolladan e.  Badar hurdi ah ayaa beeralayda tacabkoodii uga soo go'ay. Meelaha qaarkood laamaha dhaadheer oo sabuullada hoostooda la isaga xiray ayaa ummaag ummaag dhilid u diyaar ah u yaal,  sidii shucaysyo[9] la tuunshay. Meelo kalena, dhulka bannaan ayaad ku garanaysaa in hawshii hore loo ladhammeeyay. Wiilashu rakooyin dhis ah ayay geedaha dushooda ka dhakoolaan, iyaga oo dhawaaq sare ku eryaya shimbiraha badarka guranaya, halka ay aabbayaashood  balka ku goynayaan majooyin liita, ama tuumsiyo bal ah finjileyaal xun xun  la dhacayaan, ama

[8] Silsiladda buuralayda Alp ee Yurub (Faransa, Itaaliya iyo Iswisra). *[T]*

[9] Shucays (musket) waa buntukh waayadii hore la adeegsan jiray oo marka xabbad laga ridaba dhuunta baaruud looga shuceeyo. Marka iyaga oo badan la tuunsho meel gorodda ayaa la isu wada geshaa iyaga oo dhulka qotoma, sidaa ayaa waxyaalo badan oo beeraha ka soo go'a sida gallayda, haruurka, iyi sisintaba loo tuunshaa intaa aan miraha laga dhilin. *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

badarka qashirka ka saarayaan iyaga oo badeel loox ballaaran ah dabaysha kor ula bitinaya. Dumarku mooyayaal geedo ka qoran ayay sabuullo caananaas sidiisii u baxay qasharka kaga tuurayaan. Sagxadda goobta badarka lagu tumo digo lo'aad iyo biyo ayay ku malaasayaan, si ay cayayaannada uga difaacdo.dabadeedna sabuulladii masaggada ayay tuumisyo hurdi qurxoon ah ka samaynayaan inta xirmooyin midabbo kala duwan leh dherer u dhigaan oo kuwo kale dadab isdhaaf ah u saarayaan. Halkaa middabadu waa casaan iyo basali bunni galay, balka harana sida badarka oo kale ayay xanan lagu meegaaray dhex tuumiyaan. Dhammaan waxay u muuqdeen kuwo hawsha ku raaxaysaya. Heesta goynta beertu si wacan ayay dhagahayagu ugu raaxaysanyeen, kaa oo marka loo eego agabarkii aammusnaana yabaqa meel dad degganyahay uu miyuusig noo ahaa.

Hoobadkii markii aannu ka degennay ayaannu toddoba mayl oo socod ah dabadood durdur xareed ah oo Kobboda [?] ama dooxada jara dhinaciisa ku nasannay. Waxa uu xagga waqooyi biyaha ugu shubaa xagga Ogaadeen, sida dalmariyeyaashaydu ii sheegeen, abbaartaasina waa sax oo Harar aaggeeda kuro iyo durdur xagga bari ka yimaada oo galbeed u socda midna ku ma aanan arag. Dadkii Qotida ahaa ayaa dibadda usoo yaacay, si ay noo daawadaan. Ma ayan hubaysnanyn, sidii badawidana 'Buuri' baryadii nagu ma ayan soo dhowayn. Hakashadii ayaannu durdurrada ay dhinacyadooda Ayeeyolugdheerta waawayn ee basali iyo cagaar nugul ahi ka buuxdo ag degnay. Awrtii markii aannu ku soo noqonnay, waxa aan shiishay nooc tuke ah oo markaa dabadeed si joogto ah carriga loogu arkayay. Qiyaastii saddexlaab ayuu ka waynyahay tukaha Ingiriiska, midabku waa madow yusur ah, dhaladu waa xay cad, kubaystuna si aan caadi ahayn ayay u baxday. Gumaca uu xammilay inta uu la'ekaa ayaa iga yaabisay! Wadaaddo dhawr ah ayaa dabdeed soo ururay, si ay noo soo dhoweeyaan, dhawr Habar Awal ah oo safar ka soo noqdayna waa na salaameen, iyaga oo ciidankaygii "ilma adeero" ugu yeeraya. 'Wallee', ayuu ku jawaabay Xammaali, 'marka aynnu isla innaga nahay midba kan kale ayuu rubadda jaraa; marka aannu shisheeye la joognana ilma adeerrayaal baannu noqonnaa!'

Sagaalkii saac ee habeennimo ayaannu waddadayadii taaggii cagta sii saarnay. Meesha waxaa daadsan dhadhaabbo dhagax dixeed ah oo si la yaab leh u tuuran, meel walba oo ishu qabatana waa beero, degmooyin iyo biyo qulqulaya. Dabayl xooggan ayaa dhacaysay, Yawmul Qiyaamena wuxuu soo qabsaday maahmaahdii Soomaalida 'kulayl waad ka kacdaa, qabowse waa qabri'. Awrtii inta daalkii ka batay dabayshiina aad u cuslaatay ayaannu socod saacad iyo bar ah ka dib aqalkayagii ka mudannay degmo fogaan todoba mayl kuraha Gurays u jirta. Wadaaddadii suufiyada ahaa ayaa habeenka ilaa waqti dambe na soo jeediyay. Aw Samatar ayaa soo jeediyay mas'alada ah; 'Ma bannaantahay in buur dusheed lagu tukato iyada oo bannaan la helayo?' Haa iyo maya ayaa loo kala naqsaday, hadalkii dooddana si xiise dheeri ah leh ayaa la isu la banbaxay.

Subaxii Arbacada, hal saac iyo bar, ayaannu hoobad u dhaqaaqnay xagga 'Wilensi', buur yar oo salle siman leh oo aannu cagteeda ka filaynay in uu nagu sugayo Garaad Aadan, mid ka mid ah guryihiisii badnaa. Dooxo bacrin ah ayaannu sii dhex qaadnay oo taag kale oo tiban jid dhagax iyo jay ah sii tafnay. Shirwac oo martigelinteenna ku dedaalay ayaannu sii marnay. Hore ayaannu u sii luudnay, markii aannu mayl iyo bar laba saacadood nagu qaatay soconnay dabadeedna gaadiidkayagii daallanaa ayaa degmadii Garaadka soo gaaray. Markii war la helay, waxaa la ogaaday in ugaaskii uu maalintaa aaday degmo kale oo Sagharrah la yiraahdo, isaga oo ku hawllanaa soo ururinta laba faras iyo 200 neef oo ahayd lo' lagu bixinayay diyo uu Amiirka Harar ku helay nin laga dilay.


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Markii aannu degmada dhereranta diifaysan ah ee Wilensi galnay ayaa kooxdayadii waxaa kala goostay labadii ooryood ee Garaadka. Xammaali, Kalendar, Shehrazade iyo Deenarzade waxay ku hareen Buux iyo walaashi gurigeedii; halka Guuleed Dheere, Yawmul Qiyaame iyo aniga nala geeyay gurigii Garaadka xaaskiisii ugu qurxoonayd, Sucdiya [ama Sacdiya]. Waxay ahayd haweeney dheer, midab maarriin furan ah leh, oo si qurxoon ugu labbisnayd guntiino Harari ah, dhego qalin ah, iyo nooca qoorgashiga la yiraahdo Jalbad ama Qardhaas.[10] Garaadadda ayaa amartay in waylaalisahayaga na loo ku fidiyo aqalka dhinaciisa wanaagsan, dabadeedna na siisay cunno ka kooban hilib lo'aad karis ah, bocor iyo soor haruur Jowaari. Muddadii yarayd ee aan gembiskaa joogay waxaan gacaliye L[umsdenoow] kanshe u helay in aan u kuurgalo maamuuska iyo dhaqammada Somaalida negi ee reer magaalka ah.

Guriga gudihiisu ma camirna. Marka aad iridda gasho, loox qura oo biinan kaabiga kor kaga dheggani safeexado u yihiin oo dhab ahaanta farsamo aan qurxoonay ah, sida alaaba Spain iyo Corsica[11] lagu arko; waaxaad u tegaysaa qolqol derbiyo cilinno dhis iyo dhoobo ka samaysani ay saddex qol oo ragga, dumarka iyo xooluhu kala galaan u kala qaybshaan. Gammaanka iyo lo'da oo habeenkii dhanka bidxeed ee iridda lagu xiro ayaa guriga ku sima kanshe habeenno badan lagu caweeyo. Ooryuhu dhanka midig ee dhadhaarrada waawayn ee jikada iyo dedib kor loo dhisay ku yaallaan ayay seexdaan, ragguna halka ugu wanaagsan, waa muska dambe ee ka soo horjeedka irridda ka fog e. Saqafka raarka ahi qaac yusur madow ku noqday ayuu la dhalaalayaa, isaga oo marka loo adkaysan waayo daaqad silloon laga neefiyo. Tani badanaa ma dhacdo, maxaa yeelay qaac, dufantiryo iyo wasakh diirisa cawaantu waa u bogtaa. Maacuunka ayaan isna aan sidaa u buurnayn. Geed jiriddi iyo laamo la soo jaray oo qodbo dhulka ku haya looga dhigay ayaa waxaa suran gaashaammada, warmahana derbiga ayaa la qotomiyaa. Kurtummo dhinacyada udub dhexaadka ka taagtaaganna waxaa la sursuraa dharka iyo alaabada kale ee aboorka [ama dhuuracasada] soo jiita. Dhiilo[12] culan iyo fijaanno buneed calculus oo dhoobkii Harar ah, xeedhooyin salal dhaadheer leh iyo fandhaallo si qurux badan isla geedka laga qoray ayay maacuunta reerku ka koobantahay. Guriga waxaa deggan Garaado iyo canuggeeda Siddiiq, gacanyaro Oromo ah, gabdhaha adeegayaasha ah iyo Soomaali badan. Sidaa ayaannu mar walba u maqallaa saddex af oo guriga looga hadlayo.[13] Waaberigii ka hor ayay oorida wanaagsani kacdaa, adeegtooyinka kicisaa, dabka hurisaa, oo quraacda subax diyaarisaa.

Maxdinka laga ma yaqaan halkan.[14] Dhagax goobo sulub ballaaran ah oo culayskiisu 15 rodol ku dhowyahay iyo riiqe dhexroorku lix inji yahay ayaa loo adeegsadaa ridqidda haruurka, iyada oo labada gacmoodba lagaga shaqaysiiyo, isla markaana si qaab daran afarta iyo calaacalo lala jilbajabsanyahay maxdinka dushiisa. Mar mar waa in biyo lagu firdhiyo badarka ilaa cajiin wanaagsan oo in tannaarka loo tuuro u diyaar ahi uu ka samaysmo. Sidaa ayay ku qaadanaysaa shaqo dhawr saacadood ah, si loo diyaariyo rodol yar oo muufo ah.

[10] Waa tax ka samaysan shilimmo yaryar oo qalin ah iyo qurxinno kale, Carabta ayaa Berbera ku samaysa. *[B]*
[11] Jasiirad taariikh dheer leh oo badda Miditerranean ku taal. Talyaaniga ayay u dhowdahay, waa se gobol Faransa ka tirsan. *[T]*
[12] Quluc/ubbo, waa weel nooc miraha bocorka ka mid oo inta la qallajayo, halka uu geedka kaga yiil laga duleesho, miraha laga daadsho, fur loo yeelo, dabadeed weel wax lagu shubto laga dhigto. Badanaa weesada ayaa Soomaalidii hore u adeegsan jireen. Haddii luqunta ama sibirta laga jaro waxaa laga dhigan karaa baaquli, koob, ama saxan, hadba inta mirta laga jaray la'egtahay marka la qallajiyo. *[T]*
[13] Somali, Harari, iyo Galla [Oromo] ay weheliyaan Carabi iyo afaf kale oo ilbaxeed. *[B]*
[14] Maxdinkii Yurub ayuu ka wadaa. *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Abbaarihii 12 saac oo subaxnimo ayaa quraac xooggan oo hilib solay lo' iyo idaba leh ah oo ay weheliso furin haruur Jawaari fuudna la isku la wada iidaamay la soo dhigay. Ragga wax yar ayaa wax weeso ah haleela, dhammaantood se waxay ka simanyihiin in ay cadaydaan inta ayan cunno u fariisan. Cuntada ka dib, qaar qorraxda ayay kadaloobsadaan, qaar kalana macaash ayay jarsadaan, ama xoolahooda duurka u daaq geeyaan ilaa shan saac maalinnimo oo waqtiga qadada ah.

Cunnadu is beddel ma leh oo mar walba waa hilib iyo haruur. Dadkani digaagga waa yasaan, khudaartana waxay u haystaan quud xoolaad. Dharaarta kala gabbasho ma jirto oo rag, dumar iyo caruurba guriga ayay soo galaan. Garaado oo iyada oo qaylinaysa wayddiinaysay in ay u yimaadeen in ay baabuun[15] daawadaanna ma celin karin. Kirliga xiiso gaar ah ayay u hayeen. Qaar waxa ay ku sheegeen goroyo, qaar kalana mas. Si ay haataba, Sucdiya ayaa si dhakhso ah ku ogaatay waxa loo adeegsado, dabadeedna si aan loo adkaysan karina iiga bariday shaygan aan wax loo dhigo la helin. Maalinta oo dhan gabdhaheeda adeegtooyinka ahi waxay ku hawllanyihiin ridqid, karin iyo muran qaylo badan. Ragga shaqo ka ma dhacdo, marka laga reebo tubaakaysi, sheeko iyo in taalooge ku xeel dheeri uu guudka u firo. Galabtii gammaanka iyo lo'da guriga ayaa loo soo hoyiyaa, si loo liso [lo'da] oo loo xereeyo.[16] Markii shaqadan la dhammeeyo ayaa dhammaan casho wehel leh loo jeestaa. Wax yar uun ayay hurdo ledaan, ilaa habeenku fogaadana waa soo fadhiyaan, iyaga oo dabka hadba qoryaha isu raacinaya, si rayn lehna koobab Farsho[17] ah ugu dul sheekaysanaya. Dhawr mar ayaan isku deyay qooshkaan yaqyaqsi ayuu se ii dhadhamay. Dhadhanku waa biir madaxa toos u abbaaraysa, geed sun ah oo diirkiisa lagu daro darti. Ubbooyin qulco ah ayaa lagu shubaa, masarafad sabuullo haruur ka samaysanna waa la saaraa, dahaar suuf ah oo qulucda afkeeda yar ku gufaysan ayaa koobab iyaguna aan casri ahayn lagaga shubaa. Dadka cabbaa khamriga ayay hareero fariistaan maaddooduna waxay ka marag kacaysaa sarkhaanka ay leedahay. Subaxii madax xanuun iyo indho xamil ah ayay la soo kacaan; laakiin calaamadahaas dadkeenna shaqada badani haraamo Soomaalidu ma necba. Hurdo ayay keenaan, wax maskaxda shiidaadda ladan lagu maaweeliyana waa laga helaa. Aalaa iyada oo la buuqayo ayaan hurdo dhacaa, laga reebo marka kaladhal Cambar la yiraahdo oo safar uu Harar ku tegay ka soo noqday uu sheeko baralaydiisii nagu asqaysiiyo, ama baxdoowgii Abtidoon ahaa uu ka wareego tix sidaan u dhigan:-

"'Tis joyesse all in Eesa's home!
The fatted oxen bleed,
And slave girls range the pails of milk,
And strain the golden mead.

Tis joyesse all in Eesa's home!
This day the Chieftain's pride
Shall join the song, the dance, the feast,
And bear away a bride.

[15] Nooc daayeerrada ka mid ah. *[T]*
[16] Gammaan waa meesiga fardaha iyo inta la halmaasha. *[T]*
[17] Dunida Bariga khamiirintan caanka ah guud ahaan waxaa lagu magacaabaa 'Buzah', halka erayga Jarmalku ka yahay 'büsen', waa'booze'kayagii e. Xoogaa toon ah haddii lagu daro, waxay noqotaa wax la isku matajiyo [ama la isku qarasfalo]. *[B]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

He cometh not!’ the father cried,
Smiting with spear the wall;
‘And yet he sent the ghostly man,
Yestre’en before the fall!’

He cometh not!’ the mother said,
A tear stood in her eye;
‘He cometh not, I dread, I dread,
And yet I know not why.’

He cometh not!’ the maiden thought,
Yet in her glance was light,
Soft as the flash in summer’s eve
Where sky and earth unite.

The virgins, deck’d with tress and flower,
Danced in the purple shade,
And not a soul, perchance, but wished
Herself the chosen maid.

The guests in groups sat gathering
Where sunbeams warmed the air,
Some laughed the feasters’ laugh, and some
Wore the bent brow of care.

Tis he!—’tis he!”— all anxious peer,
Towards the distant lea;
A courser feebly nears the throng —
Ah! ’tis his steed they see.

The grief cry bursts from every lip,
Fear sits on every brow,
There’s blood upon the courser’s flank!—
Blood on the saddle bow!

Tis he!—’tis he!’— all arm and run
Towards the Marar Plain,
Where a dark horseman rides the waste
With dust-cloud for a train”.

“The horseman reins his foam-fleckt steed,
Leans on his broken spear,
Wipes his damp brow, and faint begins
To tell a tale of fear.

Where is my son?’—‘Go seek him there,
Far on the Marar Plain,
Where vultures and hyaenas hold


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Their orgies o'er the slain.

We took our arms, we saddled horse,
We rode the East countrie,
And drove the flocks, and harried herds
Betwixt the hills and sea.

We drove the flock across the hill,
The herd across the wold —
The poorest spearboy had returned
That day, a man of gold.

Bat Awal's children mann'd the vale
Where sweet the Arman flowers,
Their archers from each bush and tree
Rained shafts in venomed showers.

Full fifty warriors bold and true
Fell as becomes the brave;
And whom the arrow spared, the spear
Reaped for the ravening grave.

Friend of my youth! shall I remain
When ye are gone before?'
He drew the wood from out his side,
And loosed the crimson gore.

Falling, he raised his broken spear,
Thrice wav'd it o'er his head,
Thrice raised the warrior's cry 'revenge!'—
His soul was with the dead.

Now, one by one, the wounded braves
Homeward were seen to wend,
Each holding on his saddle bow
A dead or dying friend.

Two galliards bore the Eesa's son,
The corpse was stark and bare —
Low moaned the maid, the mother smote
Her breast in mute despair.

The father bent him o'er the dead,
The wounds were all before;
Again his brow, in sorrow clad,
The garb of gladness wore.


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Ho! sit ye down, nor mourn for me,'
Unto the guests he cried;
'My son a warrior's life hath lived,
A warrior's death hath died.

His wedding and his funeral feast
Are one, so Fate hath said;
Death bore him from the brides of earth
The brides of Heaven to wed.

They drew their knives, they sat them down,
And fed as warriors feed;
The flesh of sheep and beeves they ate,
And quaffed the golden mead.

And Eesa sat between the prayers
Until the fall of day,
When rose the guests and grasped their spears,
And each man went his way.

But in the morn arose the cry,
For mortal spirit flown;
The father's mighty heart had burst
With woe he might not own.

On the high crest of yonder hill,
They buried sire and son,
Grant, Allah! Grant them Paradise —
Gentles, my task is done!"[18]

Durbadiiba, markii aannu Wilensi soo gaarnay ayaannu Yuusuf Dheere, waa Garaadka wiilkiisii labaad e, u dirnay in uu aabbihi u yeero. Muranno badan oo Xammaali iyo Yawmul Qiyaame u dhaxeeyay ayaan rabay in aan xalliyo. Kan dambe madaxtaag ayaa ka buuxay oo markan wuxuu isu xilsaaray jagada danjire Xaajiga ka socda oo garaadka Geri loo soo diray. Sidaa darted, wuxuu damcay in uu safarka hoggaamiyo. Dabadeed waxaan diyaar u noqonnay in aannu  guurno, haddii ay dhacdo in uu Garaadku na jid marin kari waayo. Shehrazade iyo Deenarzade iyagu markii ay maqleen furuq Harar ka dillaacay ayay iyaga oo wajiyadooda la baqaya aad ugu baryootameen in laga tago. Dabadeed Kalendar ayaa lagu amray in uu hablahaa qurxaha badan ogaado, in kasta uu si ragannimo leh uga soo horjeestay. Geesigii Buux ahaa go'ii wacnaa ee loo ballanqaaday ayuu ku labbistay, maadaama aanay magaalada geliddeeda wax  ku dirqiyaa jirin, inta hadiyado yaryar la siiyay ayaa la fasaxay.Dabadeed, nin da' wayn oo badawi Geri ah oo dadka badankiisu Saciid Waal u yaqaanneen ayaa loo dooray in uu na weheliyo. Awrtu, maaddaama ayan dhabbayaasha adag  ee buuraha mari

[18] Gabaygan in aan sidiisa ku daayo ayaan door  biday, si macniha guud iyo dhadhanka murtiyeed aanay uga lumin. In asalkiisa af  Soomaali lagu mariyay ayay u badantahay oo markaa uu R. Burton afkiisa u rogtay, intii karaanki ahayd ee uu fahmi karay. In af Igiriisi laga rogo oo af Soomaali lagu celiyo, iyada oo aan asalkii lagu hayn ama xarafraaciisa la garanna dhibkeeda ayay leedahay. *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

karin, rarowdayadii daallanayd daaq iyo nasasho ayaan u sii daynnay, Shirwacna looga tegay in uu ilaalinayo. Si aannaan uga dib dhicin kiraysiga dameeraha oo ah gaadiidka kaliya ee dhulkan oo ay noo dheerayd iyada oo la hubo in alaabadayadu ay halkan kaga ammaansantahay Harar agagaarkeeda ayaannu alaabada intii ugu muhiimsanayd uun ka xulanay oo ku cabbaynnya laba kolay kooreed oo harag ka samaysan oo uu dameer qur ahi qaadi karo.

Intaa oo dhan haddii si qumman meel loogu ogaaday; Diseembar 29, 4 saac oo subaxnimo ayaannu daabbadahayagii fuulnay oo iyada oo uu Saciid Waal na horkacayo dhanka waqooyi ee buurta Wilensi la laabannay oo jafle hoos dhabbe uu ubaxa dog roses udgoon hareereeray u la degannay. Ka dib, waxaa bilowday ka daaddegga kur dhagax hoos u tiban, derbiga warraq dhir badan oo dhererkiisa halalowda ah durdur dix wayn oo dhuubmay uu sidii daliig qalin ah u dhex dulundulcaynayo. Dhabbahan laga ma hawo qabo in ay mari karaan wax aan sida dameer u gommodo sugnayn. Dhagxyo goglan ayaannu aayar ugu soconnay xatabado quruurux ah oo haddana kayn qodax ah uga sii gudubnay. Sidaa ayaannu saacad barkeed ku soconnay. Banka hoose waxaa ka muuqday degmo Midgihii Garaadka ah oo u soo baxay in ay na daawadaan marka aan gudbaynno, iyaga oo socotada ilaa cabbaar daba socday. Mid ayaa wuxuu yiri, "buntukhiisu muxuu tarayaa? – inta uusan dab qaadan ayaan falaartan ka taagayaaye!" Dabadeed dushooda ayaan xabbad ka riday, halkaa oo gariirka aragaggaxa leh ee jugta aan la filayni ku markatay aan si dhagar leh ugu maadsaday.

Hore haddii aannu u sii soconnay, waxaannu ku soo dhacnay togga Xariirad oo halkaa ka sii socda. Waa tog dheer oo kayn jiq ahi cabburisay, jiid biyo xareed fallaaraha cadceeddu midab dahabi ifaya ah u yeeleenna dhex dulundulcaynayso. Soomaalidaydii waxay sheegeen in haddii maroodiyada meesha buuxaa laga layn lahaa bariis badan laga beeri karay toga dhinacyadiisa, waa cunnada qaaliga ah ee carrigan loogu jecelyahay e.

Jidkayagu wuxuu sii dhex maraa cutubyo geedo hoos leh ah hoostood, durdur qar ka shuba dushi, safaf tiin qodax leh ah iyo degaandeg haadaamo cagta dadku ay cabbirka siddeed ilaa toban cagood qarar dibir adag oo dhoobo guduud bacrin ah hoos uga qodday. Dhinac walba waxaa ka muuqday jarar dhaaheer, warraqyo iyo dildillaacyo dhammaantood xilligan wada qallallan. Beeralaydii aan hubaysnayn ayaa xaafadihii taxnaa ka soo yaacay, si ay noo dhugtaan, Soomaalidaydiina maadaama ayan degaankoodii joogin warmahoodii silloonnaa inta meel iska dhigeen ayay banaatiikh ku beddesheen. Jidkaa, markii aannu degmadii Aw Samatar maraynnay, gacallowyadu waa na hakiyeen, intii uu gaawe wayn oo caano karuur ah noogu maqnaa. Abbaarihii duhurrada, neecawda waqooyi ayaa milicda kulul daruur ku dabooshay, baqalladayadiina waxaannnu ka waraabsannay durdur buur ka hoora oo waddadayadii in 100 yaardi dhexdood ah laba meelood ka gooyay. Lix mayl markii aannu sii fuushanayn ka dib, oo togga madaxiisii gaarnay, ayaannu haddana bilownay in aan ku daadegno dhabbe karin dhagaxa mara. Muuqaalka nagu xeerani aad buu u wanaagsanaa. Buuraha dhinacyadoodu dhir fiican ayay lahaayeen, geedka Dayibkana waa la madoobaayeen. Figahooda sare waxaa ciid ka dhowray maansuunka culus oo dooxooyinka ciid bacrin ah ku daadsha, meelo badan oo biyadhacyo ahina sidii tarniigyadii ayay dhagxaanta madmadow ka dul dhalaalayeen. Degmooyin beero iyo xayndaabyo ku hareeraysanyihiin ayaa carriga teel teel u yaal, inta ishu qabatana waa fig basali ah iyo guro lafcir ah oo silsilad dheer oo inta ishu qabato is haysata ah. Degaandegga gebiga shishe ee dooxada waxaannu ku aragnay haraadi kayn qaddiimi ah. Waa dhextaallooyin kaymo yaryar oo gudinta ka badbaadey ah, gar ka garna cida digiiran iyo daayeerradu isu baxayso. Haddii dalagga hurdiga ah ee Haruurku


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

sarreen ahaan lahaa, mar kale ayaan naftayda khayaali ugu sheegi lahaa in aan dhex kooraynayo degmooyinkii wacnaa ee Siennadii Tascany.[19]

Tobankii saac oo galbanimo, markii aannu 15 mayl oo dhul adag ah jarnay, ayay Sagarrah noo muuqatay. Waa degmo yar oo xayndaab dheer leh, si wanaagsan u taal, siddeed ilaa sagaal aqal oo buur dhinaceed ku qabsan ka kooban, dusha dhiri ka tahay, hoosna dooxo bacrin ah oo badarka lagu beero. Muggaan Saciid Waal ayaa noo tilmaamay Garaad Aadan oo guriga ku sii socday, isaga oo koox yari weheliso. Banaatiikhdayadii ayaan salaansharaf ahaan u ridnay, markaa oo uu hore u degdegay, si uu aqalkiisii si habboon noogu qaabbilo. Iridda markii aannu ku degnay ayaannu salaan gacanta ka salaannay, markaana inta shamuum foogan nala sii dhex mariyay nala geeyay qol qiiq leh oo daarka gudaha ah laga qolay, dabadeedna furin qamadi laga sameeyay oo malab iyo subag la kumbiyay nala ku sooray. Martigeliyihii inta naga tegay, si aannu u cuntaynno, ayuu dhakhso noogu soo laabtay. Nin wax badan oo dano ahi ku xirnaayeen ayaan si taxaddar leh u dhawrray.

Aadan Kooshin, muuqaal badawi xayaysi xooggan ah ayuu lahaa, intii aanan duub siinna timahiisa xooshka ah waa u cilaannaayeen. Waa ilaa 45 jir, ugu yaraan 6 cagood dherer jeeda oo xubno kala baxsan, dhoollo caddayn ku hodaysa iyo indho ku dhaafsanna leh. Dabci ahaan waxa uu ku bannaanaa mid ka mid ah doqommada wax dhagra ee sida ay u qaab daranyihiin ay adagtaahay in wax lala qaybsado. Hanwayne hunguri qaaday waxaa u dheer sal fudayd inta uu ka qabo. Waaxa uu u muuqday in maskaxdiisa waxa ku jiraa ay mar walba is rogrogayeen, saacad barkeedna aanu aayar meel salka dhigi karin. Salfudaydkiisa guud waxa uu calaamad muuqata u ahaa kiisa laabta fadhiya. In kasta oo uu geesi la yaqaan yahay, dhagartiisa ayaa magacxumo u soo jiidday. Muddo sanado laga joogo ayuu gabar uu dhalay u ballanqaaday wiilka curadka ah ee Garaad Xirsiga qabiilka Bartire, markaa ayuu haddana si xeerka gobannimada ee Soomaalida ka horjeedda gabadhii u guuriyay Maxammad Wacays oo Jibriil Abbokor ah. Taasi waxay oogtay colaad ninkii gabadha laga qaaday lagu dilay. Aadan guur badnaan ayaa looga haray, xataa iyada oo Bariga Afrika carriga la joogaa yahay. Isaga oo shantiisa wiil iyo darsin gabdho ah adeegsanaya ayuu ku guulaystay in uu xididdo badan muto. Walaashi, Gisti[20] Faadumo waxaa guursaday Abubakar, Amiirka [Harar] ee hadda aabbihi. Saa oo ay tahay, Garaadka sidii isaga oo af yaxaas ogaal isugu shalwiyay ayay ka yihiin. Sababta ugu wayn ee uu sida wanaagsan noogu qaabbilay waxay ahayd uun dan soke oo uu qalcad uu dhisto ka lahaa, si uu ganacsiga ugu taliyo Hararna uu u la tartamo ama uga marooqsado. Wali se fursad fiican ma sii daynayn oo wixii uu arkaba waa naga baryay markii la siiyay seef, kitaab Qur'aan ah, cimaamad, koodh Carbeed midabka saatiin qurxoon ah, ilaa 70 go', iyo intaa in u dhiganta oo maro bullugan ah ayuu dabadeed faq ahaan iigu cawday in Xammaali wax 12 maro dhaafsiisan aanu siin. Tirada waxa uu doonayo ayaa ninkan hungurigiisa sharraxaad ka bixin doonta. Waxa uu iga baryay in aan Berbera uga keeno seef samay qalin ah leh iyo xoogaa saabbuun ah, 1000 doollar, laba sed oo jijimo qalina ah, 20 qori oo rasaastoodii iyo baaruuddoodii wata, koodh midab cas ah oo rakaame dahabi ah lagu xardhay, xoogaa sun aan laga kicin ah iyo wixii alaabo yaryar oo qurqurxoon ah ee isaga ku rayn lahaa. Taa beddelkeeda waxay ahayd in uu fardo, baqlo, addoomo, fool maroodi iyo waxyaabo kale oo qiimo leh naga siiyo. Si ay ahaata ba se, waaba uu iska illaaway in uu sidaa yeelo inta aannaan ambabixin. Garaad Aadan waa nin awood badan, maadaama uu madax u

[19] Sienna ama Siena waxay ka tirsantahay Gobolka Tuscany ee carriga Talyaaniga . *[T]*

[20] Gisti, Afka Harariga waa magac darajo tilmaamaya. Wuxuu u dhigmaa erayga 'princess', Soomaaliga wuxuu u dhigma erayga Garaado. *[B]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

yahay qabiilo beeralay ah oo aan sida badawida jilbo kala madax bannaan u kala qaybsananyn, sidaa awgeed na si toos ah ayuu taliskiisu u saameeya dadyow badan oo deris ah.

Geriga buuralaydaas deggani Daarood ayay ka soo jeedaan, sida ay u badanyihiin Soomalida negi, waxuuna ku abtirsadaa Koombe. Dagaal aan waxba la isu la harin oo ay Oromada ku qaadeen awgiis ayay si isa soo taraysa Maakhir oo degaankoodii asalka ahaa ahayd galbeed uga guureen. Hadda waxay dhanyihiin 5000 oo gaashaan, qiyaastii 180 degmo ayay deggenyiin, waxaana lagu tiriyaa in ay awoodda ugu sarraysa carriga yihiin. In kasta oo ay Habar Awasha heshiis la yihiin, Gerigu dhif ayay oogada uga soo degaan in daaq la'aani ku khasabto gubanta mooyee. Buuraahaas waxaa kale oo iyana dega Oromada iyo qabiillada Soomaaliyeed ee Bartire, Bursuk, Sheekhaal, Hawiye, Udbayahan, Marreexaan iyo Abasguul. Oromada Harar iyo agagaarkeeda degta waxay u qaybsantaa afar jilib oo sida caadada ah lafo badan u sii kala baxa. Aaladu xagga galbeedka ayay ilaa magaalada ka soo fiddaa, Nooluhu waxay degaan dhulka xagga bariga iyo waqooyiga bari dhaca, meel ilaa laba maalmood loo kala socdo Ciise Soomaali iyo Harar, xagga koofureed waxaa dega Baabiliga iyo Jaarsada Wilensi, Sagarrah, iyo Kondura. Waa carri bogagga qoraalkan lagu tilmaamay. Bartiraha oo dega Silsilada Golis ee koofurta Oromada deris la ah, sidaana ugu fidsan xagga bari, ilaa lagu geeyo buuraha Jigjiga, waxaa lagu qiyaasaa 3000 oo gaashaan. Daarood ayay ka soo jeedaan, waxayna hoos tagaan Garaad Xirsi. Markii aan dhulkan socdaalka ku tegay Geriga ayay col ahaayeen. Garaadka qoyskiisu dhowr fac ayay xiriir la lahaayeen Amiirrada Harar, waddada safarka ganacsi ee Berbera iyo Harar isku xirta oo dhulkiisa martana waxay ka dhigaysaa garab la xulufaysto iyo cadow laga baqo. Garaad Xirsi, warbixinno kala duwan ayaa laga bixinayay: qaar waxay lahaayeen waa ma jixinjixe iyo laayaan dhuuni ah; kuwo kalena waxay ku ammaanayeen in uu nin Alle ka baqa oo ehelusalaad ah yahay. Si ay ahaataba, dhammaan waxay isku raaceen in uu dhallinyaranimadiisii ardaalnimo mug leh ku soo dhiiqsaday. Si uu u dambidhaaf uga ajarsado, wuxuu caadaystay in uu Wadaaddada quudiyo, Sheekh Jaamaca Harareedna joogto ayuu reerkiisa marti ugu ahaan jiray. Bursuqu waxay dhanyihiin 5000 oo gaashaan, garaad ma leh, 1854-tii na dagaal ayaa Geriga, Bartiraha, iyo gaar ahaan Oromada kala dhexeeyay. Dhulkaan aanooyinku waa ka duwanyihiin sida kuwa gubanta. Reer oogadu, sida Yawmul Qiyaame uu u dhigay, saddex maalmood bay dagallamaan saddex kalena waa heshiiyaan. Qabiillada reer xeebeedku iyagu si degdegga ah isu ma beddelaan; taa waxaa u dheer diyada ay kala qaataan, wax aan halkan laga aqoon. Sheekhaashu waa Soomaalida kaliya ee buuraha dega oo Dir iyo Daarood aan midna ka soo jeedin. Iyaga oo sheeganaya in ay Khaliif Abu Bakar ka soo jeedaan ayay ku doodaan in 10 fac ka hor uu nin Aw Qudub ina Fiqi Cumar la yiraahdo uu ka soo gudbay xagga Xijaas oo uu Bariga Afrika la soo degay lixdiisii wiil ee kala ahaa Cumar-wayne, Cumar-yare, laba Cabdillaahi, Axmad iyo Siddiiq. Qabiilkan wadaaddada ahi waxay ku kala dhex firiqsanyihiin dadkooda, sidii Levi[21], waxayna ku baaheen Cifaat ilaa Ogaadeen. Lafahooda waawayn waxaa ka mid ah Aw Cumar oo ah kan u wayn iyo Bah Dumma oo ah tan ugu yar.

Hawiyaha cutubkii hore ayaa lagu soo xusay. Udbeyahanka qofaf yar uun baan ka arkay, waxay se ii sheegeen in qabiilkoodu uu 40 degmo iyo ilaa 1000 gaashaan dhanyahay iyo in

[21] Qabiil ka mid ah 12 kii reer Israa'iil oo la qoro in uu ka soo jeedo Levi, wiilkii saddexaad ee Nabi Yacquub (n.k). Sida taariikhaha Masiixiga iyo Yuhuudda lagu qoray, qabiilkan waxaa lagu jirrabay kala firiqsanaan, ka dib markii Levi aabbihi uu habaaray. Waxay ahaayeen oo kale, sida la sheego, wadaaddo qabiilooyinka kale ee reer Israa'iil ku dhex nool. Habaarku wixii uu ka ratibmay la isku ma raacsana. *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

ayan garaad iyaga ah lahayn, se  ay xeerka Garaadyada Bartire iyo Geri ku dhaqmaan. Lafahooda waawayni waa Reer Yuusuf, Reer Saciid, Reer Abbokor  iyo Yuusuf Liyo. Bariga Geeska Afrika iyo Ogaadeen marka la joogo, Marreexaan waa qabiil xoog leh, halkan se wax wayn ka ma aha oo waxay xulufaystaan Geriga. Abasguulku isaguna wuxuu ku firiqsanyahay buurlayda Harar, waxaana madax u ah Garaad Aadan. Qabiilkani waxa uu dhanyahay 14 degmo iyo inta u dhaxaysa 400 iyo 500 oo gaashaan, wuxuu na u qaybsamaa Reer Yuusuf, Jibraa'iillo iyo Warra Diq. jilibka ugu dambeeya waxaa la yiri Oromo ayuu fir ku leeyahay.

Subaxii ka dambeeyay, markii aan Shagarrah imid, jirro aan la kici waayay ayaan dareemay, dhammaan reerkuna naxariis kal iyo lab ah ayay ii fidiyeen. Garaadku Harar ayuu Furshad ka dalbay, Aw Samatar beeraha ayuu Jaad ka raadshay, wiilasha Yuusuf Dheere iyo Cilin[22] waxay aad iyo si diidmo aan la iga dhegaysan oo wehel lehi baajin, ugu adkaysteen in ay i gubaan. Marwo Khayro iyo labadeedii gabdhood ee dhaadheerka madow e dhoolocaddaynaya ee aadka loo jecelyahay ahaa, 13 iyo 15 jir, fiddahayga ayay neef ido ah u gawraceen. Xataa Oromada Kiristaanka ahayd ee ku soo xoontay in ay socotada arkaan waxay la ooyeen waxa baas ee ninkan dhulkiisii aabbe intaa uga soo waday, kaliya uun in uu geed hoosti ku dhinto. Dhab ahaan, wax camaliyaddaan ka fududi ma jirin. Waxa kaliya ee la iska rabay waa in gidaarka wajiga la saaro 4 ilaa 5 beri. Laakiin in dababax xun lo dhinto ayaa ka daran! Taa lagu ma tashan, mararka qaarna qaraar adag oo laga gaaro in la sii noolaado waxay ii la muuqataa in ay qofkeeda bixiso.

Jannaayo 1, 1855, anigoo markaa tabar dareemaya, ayaan inta ku labbistay dhar Carbeedkaygii ugu wanaagsanaa codsaday in aan Garaadka shir la yeesho. Meel cidla ah oo degmada ka dambaysa ayaan isla tagnay, halkaa oo aan si ku tiiqtiiqsasho leh ugu akhriyay warqaddii Xaaji Sharma'arke. Garaadku wuxuu u muuqday mid aad ugu farsaxsan in aannu degaankiisa ka door bidnay kan Ciise. Mar ayuu soo hadalqaaday arrintii qalcadda cusub ku saabsanayd oo anigu aan fuundigii dhisi lahaa ahay, iyo sida ay gabadhiisa wayni ku riyootay in ay socoto marti ahi dhulkan degi doonto. Markii aan mashruucii si uun Garaadka aan ugu sharraxay ayaannu banaatiikhdii la soo baxnay oo dhawr haad u toogannay ardaalka. Annaga oo hawshaa ku guda jirna ayaa waxaa soo muuqday koox shan ah iyo saddex baqal oo koorayaal Marookaan ah oo lagu qurxiyay, gambaleello iyo shakaallo qaabkii Harar leh. Laba raggaa ka mid ahaa, Xaaji Cumar iyo Nuur Cambar, waxay ahaayeen dadka degaanka. Inta kale, Cali Xasan, Xuseen Carraale iyo Xaaji Maxammad waxay ahaayeen Soomaali jilibka Habar Awal oo uu Amiirku aad ugu kalsoonaa u dhashay. Waxaa loo soo diray in ay Aadan kala xaalaan arrinta culus ee magta. Markii ilaa nus saac ku dhawaad ay nala fadhiyyeen, halkaa oo ay salaamo diirran is dhaafsadeen gacanyareyaashaydii, dameerahayagii si kuuro iyo dadamuuqsi leh u indha'indheeyeen, anigana dhowr su'aalood iga wayddiiyeen waxa aan carrigaan ka soo doonay, ayay Garaadka hoos ugu sheegeen in Carabku aanu ganacsade ahayn, meeshana aanu u iman wax aan ahayn in uu barwaaqada dhulka taal jaasuuso, kooxdiisa oo dhanna in loo gacan geliyo, si ay xabsiga Harar ugu taxaabaan. Garaadku waa ku gacansayray una sheegay in aan magan la joogta nahay oo ku sagootiyay "iska quba warkaa." Iyagoo aan ku jacsanayn guuldarradoodii ayay galab dambe carraabeen, iyagoo horkacaya 200 boqol oo lo' ahayd, beenna ku balanqaadeen in ay Amiirka nagu salaamayaan. Waxaa halkaa ka caddaatay in waddo laga fiirsaday la qaado.
Garaadku wuxuu qirtay cabsida uu ka qabo raggiisii Harar oo ku daray in uu ku waayay dhammaan degmooyinkiisii magaalada ku dhawaa. Si cad ayaan u wayddiiyay in uu na

[22] Cilinka kaliya ee aan carriga Soomaaliyeed ku arkay, 18 jir ayuu ahaa, wuxuuna u ekaa 10 jir. *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

weheliyo,  wuxuu se si cad ugu jawaabay in aanay suuragal ahayn taasi. Codsigii haddana hoos ayaan uga degnay oo wayddiisannay uun in uu inta xudduudda ku siman na mariyo. Wuxuu sheegtay in uusan awoodin taana, wuxuu se ballanqaaday in wiilkiisa Shirwac ah uu nagu darayo.

Hadda wax kale oo haray ma jirin, gacaliye L[umsdenoow], oo aan ahayn geesinnimo iyo in la is *biirqoolo* oo aan isku halleeyo waxa rag kala reebay ee ah xiddiga wanaagsan ee ayaanka leh. Wehelladaydii ayaan khudbad caaqibo leh u jeediyay oo ku wargeliyay in si dedeg ah loo kooraysto. Waxay soo jeediyeen in Amiirka warqad laga dalbayo si magaaladiisa loo soo galo. Taa laba arrimood ayaa lagu diiday. Waa tan koowaad e, haddii jawaab diidmo ah laga soo celiyo safarkayagii curdanka ayuu ku dhaday, wixii hawl aan galnayna waa hal bacaad lagu lisay. Tan labaad, Yawmul Qiyaame wuxuu faq iigu sheegay in labadayda weheliye ay maleegayaan in aysan warqaddu meeshii loo diray gaarin. Halkaa dambigiisii ayuu iyaga ku oogay uun e Xammaali iyo Guuleed Dheere waxaa ku ma ay kici karin. Laakiin, wadaadkayagii waaba anfariiray, “fulay xaar wayne’’, wajigiisii ayaa iftiimay markii lagu amray in uu Garaadka Shagarrah la joogo, si walba oo si cad fulaynimo loogu cambaareeyayna waa uu ku dhici waayay in uu bayuurta iska rogo. Weheliyeyaashaydii waxaa dabadeed lagu wargeliyay in sida aan u dhaqmaynnaa ay tii habraha tahay ee aysan ahayn tii askar lagu yiqiin ee wax uun raggannimo sheegta in lagu kaco, inta aannaan dib fulaynimo u la noqon.  Waxaa u muuqatay in ay iga go’antahay in aan kaligay dhaqaajiyo, haddii laga fursan waayo. Haaddii aan been laga sheegayn, mar qura ayay dhiig isu yeeleen oo dhammaan kaceen. Tani waa geesinnimadoodii, in kasta oo warxumetashiillo ay six un u bajiyeen. Sidaa oo ay tahay, maalin uun ka hor ayaa Soomali socoto ahi ku la taliyay in ayan "Turkigaas" Harar u raacin. Markii ay koorayaasha iska dhakooliyeen ayay caloolxumo oo dhan iska hufeen,  iyagoo sheegay in haddii la dilo  aan magahooda bixiyo, haddii ay badbaadaanna aan abaalmarintoodii gacanta fudud ka dhiibo. Marka khatar lagu jiro Xammaali gaar ahaan wuxuu la soo baxaa adadayg mug leh. Haddana, dhammaan reer Bari[23] uun ayay ku bannaanaayeen. Mar aannu Harar iyo joogiddeeda ku daalnay ayaan isku deyay in aan baxsado. Dabdeed wxay si qayaxan u caddeeyeen in taasi aanay cidna wax tarin. Intii aan ka fikirayay fursad baxsi, waxaa kaliya oo u muuqatay iyaga oo garbaduub u xiran oo askartii Amiirku dib u soo jiidayso. Waa taa waxa ay guud ahaan dhasho kasha dib ka baqda si indha la’aan ah ee Muslinka badanki.[24]
Dabadeed warqad Ingiriisi ku dhigan oo ka socota Xafiiska Siyaasadda ee Cadan ayaan u qoray Amiirka Harar aniga oo soo jeedshay in aan anigu gacanta uga dhiibo oo daboolka iska qaado. Laba arrimood ayaa igu dhaliyay in aan qorshahan ‘guusha ama go'’ ah qaato. Waa mid e, dadyawaygii aan dhulkooda maray dhammaan waxay isku raacsanaayeen in uu fulay yahay ninka asalkiisa qariya marka meelaha halista leh la marayo. Tan labaad, dubkayga cad ayaa u eg Turki oo ah kan dad loogu necebyahay oo looga sii shaki badanyahay Yurubi walba, haybaddeenna la’aanteed. Intii aannaan Shagharrah dhaafin, waxaan Yawmul Qiyaame ku ogaaday sadarro dhawr ah oo u socday Dhamme Herne oo Berbera jooga, anigoo u tilmaamaya sidii uu wax yeeli lahaa haddii laga fursan waayo ama arrini xumaato. Alaabadayadii haddana aad ayaa loo dhimay. Intii badnayd waxaa looga tegay Aadan, wixii aan innaba laga maarmi karinna dameer qura ayaa qaaday; dhar beddelasho, buug ama laba,

[23] Reer Barigu waa ka soo horjeedka dunida reer  Galbeedka. *[T]*
[24] Halkan waxaa ka muuqda naftihallignimada aan garashada ku dhisnanyn ee Burton  markii dambe naftiisa sigtay, jaalkina galaafatay.  Xaggee ayay la ahayd in uu carar ku gaari lahaa? Meeday geesinnimadii uu markii hore ku faanayay? Muu dagaallamo intuu carari lahaa?  *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

xoogaa buskud ah, rasaas iyo wax yar oo tubaako ah. Dalmariyeyaashaydii Geri waxay ka koobnaayeen Shirwac, badawigii Abtidoon ahaa iyo Saciid Waal oo baqalkii Yawmul Qiyaame fuushan.

Jannaayo 2, 4 saac oo subaxnimo, ayaa degmadii oo dhan la soo ururshay oo Faatixada na loo akhriyay, iyadoo in aannu rag geeri looga sabray nahay na loo ku labqaboojiyay. Dabadeed, dhabbe kii ugu xumaa ayaannu ka fuulnay buur dhagax leh duleedka Shagharrah, kayn iyo gubad sii marnay oo mar kale qarar wada dhagax miiran ah ka sii degennay. Dhusha sare waxaa yiil degmo uu Shirwac ku hakaday, isagoo sheegay in uusan ku dhicin in uu hore u dhaafo. Nin hubaysan ayaa se nala soo raaciyay, si uu nooga gudbiyo Jarka Oromada. Saacad markii aan sii fuushanayn ka dib ayaannu gaarnay salka buur dheer, guro fidsan leh oo Kondura lagu magacaabo. Halkaa jidkayagii, dhabbe ari oo dhagaxyo iyo geedo jajabay, meelaha qaarkoodna geedsaar waawayn oo dusha kaga hadoodilani uu ciriiri ka yeelay, kor iyo hoosna kayn ah. Quruxda Vallombrosa-dan[25], oo i soo xasuusisay muuqaallo mar aan joogay Touraine[26] ku raaxaystay, in aan u bogo mooyee wax kale ii ma ekayn. Xagga sare ee bidixdayada ah waxaa dherer u qotomay babacyada iska soo horjeeda ee buuraha dhedaysan oo darfaha cutubyo dhir Dayib ah ku leh, xagga midigna dhirta qarisay ay faraqyada soo daraan tog dheer. Neecawda qabow ayaa fooryaysa, fallaaraha cadceedduna sidii udbo dahab ah ayay dhirta dhaadheer ee hooska leh ka soo dusaan. [Waa tabtii gabyaagu yiri: …] 'Bearded with moss, and in garnments green […]'[27] e, dhulka waxaa daboolay caws dhedo ku habsatay, jirridaha geedahana waxa ka baxay ubaxyada thistles, daisies. Waa ubaxyo midabku lafcir saafi ah yahay oo marka kor laga arko si fiican loo moodi karo violets. Muggan waxaa na joojiyay koox darsan Oromo ah oo la jooga Rabah, Garaadka iska leh Jarka. Sidani waa sida uu kastanka canshuurqaadka Afrikaanku u egyahay: isbaaro waxaa u ah waranleyaal buurbuuran, albaabkuna waa laba waran oo kaabaadda dusheeda lagu gudbay. Rabsho yari ma jirin, iyagoo ka baqaya in ay caado dhaqan ka tagaan, waxaannu se u sheegnay in dameerkayagu aanu wax ganacsi ah sidin.

Dabadeed inta Kondura baalkeeda waqooyi la laabannay ayaannu galnay carriggii Amiirku ka talinayay. Meel qiyaasta 30 mayl jirta oo ay dooxooyin lafcir u eg oo is daba yaallaa ka sokeeyaan ayaa waxaa ka muuqda Harar, mukul madow oo sagxad cawl ah oo caws leh dusheeda saaran.

Inta xoogaa joogsannay, si aan guusha u carafsanno, ayaannu bilownnay in aannu hoos u daadegno. Dhulku wuxuu ahaa carramadow dhiiri ah oo aan dhedo ka dhammaan Kondura dusheesha iyo durdurro si joogto ah uga hoora biyadhacyo dibir dhooqo madow ah. Xoogaa geedka Birbisaha aadka u waawayn ah oo ka haray kayn wali jiq ku ah buurta babaceeda ayaa jidku ka dhex baxaa. Waxay ahaayeen geedo laan walbaa ay faracyo fara badan lahayd, badankooduna waxay ballaca la'ekaayeen 20 ilaa 25 cagood.[28] Saacad markii aannu thistles ubaxyadiisu casaanka ifaya xigeen oo midkiiba aanu ka yarayn ilme yar madaxi dhex maraynnay dabadeed ayaannu baqalaheennii ka waraabsannay il yar oo degaandegga ka hoosaysa. Dabadeed, dib ayaannu uga kooraysannay. Waxaan qardajeex ku marnay buur

[25] Meel ku taal gobolka Tuscany, carri Talyaani. *[T]*
[26] Gobol bartamaha Faransiiska ku yaal. *[T]*
[27] Baydkani wuxuu ku jiray gabay la yiraahdo *A Tale of Arcadie* oo uu tiriyay (1847) gabyaagii Henry Wadsworth Longfellow. *[T]*
[28] Geedkan ayaa laga qoraa albaabbada, qabaallada iyo qaafiriyada Harar. *[B]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

dusheed, halkaana kaga dhacnay tog yar oo beeralay Oromo ahi ay finjilayaan oo bakaaraynayaan badarkoodii u soo go'ay, iyagoo heeso farxad raynrayn leh ku dheeraysanaya. Si fudud ayaa loogu soo sooci karaa muuqaalkooda Afrikaanka dhabta ah ee aan u dhawayn Soomalida baxaalligoodu ku Caraboobay soogalooti Yaman iyo xaggaa Xadramuut ka yimid waayo hore. Markii aannu 10 mayl oo toos ah jarnay ayaannu casarliiqii marnay xidh moxog ah oo dhanka dabayshu ka soo dhacayso ka dugsiiya Garfa, degmo midgo ah oo Garaad Aadan badarka u gura. Farxad ayay la yabqeen markii ay garteen saaxiibkoodii hore, Saciid Waal. Waxay na geeyeen Gambiso bannaan oo ay nadiifiyeen. Dabadeed , dab ayay shideen, baqleheennii daaq geeyeen, oo haddana inta baxeen raashin noo dooneen. Martigelintoodii se waxaa carqaladeeyay laba qof oo reer Harar ah oo hoos ugu hanjabay colka Amiirka haddii ay isku dayaan in ay Turkiga martigeliyaan. Markii habeenkii galay ayay farriini ka timi cadawgayagii Habar Awal oo ku baaqay in aan sugno ilaa subaxnimada, si aan isugu lug darsanno oo magaalada u galno. Garaad Aadan ayaa hore iiga la taliyay in aanan nimankaa isku daaran. Sidaa ayaan ugu cagansayray taladii labadayda weheliye oo jawaab ugu celiyay kuwii kale in aan dhawraynno ilaa laba saac subaxa dambe.

Subaxii Jannaayo 3, hal saac markii ay ahayd, ayaannu maqalnay in dhagarmaaganayaashii Habar Awal ay xoolohoodii la guureeyeen, wax yar ka dib habeenbarkii xalay. Markii aan dareemay xumaha ay u dan leeyihiin ayaan waxaan xusuusqorkii, buuggii aan wax ku sawirayay, iyo buuggaag kale uga tegay oday Midgaan oo faray in Garaad Aadan loo gudbiyo, aniga oo go'aansaday in aannaan qaadan waxa aan hubkayaga iyo xoogaa hadiyado aan Amiirka u sidnay ka ahayn. Baqalaheennii ayaannu kooraysannay oo inta fuulnay si degdeg ah ula durdurinay garka warraq qurux badan oo dhagaxnuuradeed jilicsan oo midabkiisuna basali yahay oo meelo dooggu qariyay. Bartamaha waxaa ka mara durdur dhinacyadu bidhaamayaan oo Doghlah lagu magacaabo. Marakan biyadhacyo yar yar ayaa ka shubmayay, dabadeedna dhadhaabbo sallaxyo waawayn leh ayaa ka hooriya oo xagga Webiga [Togga] Erer ku shuba. Muggan, annagoo xatabado dhagax ah oo xataa dameeruhu dirqi ku maraan ka daadegaynna ayaannu gubadka sii raacnay. Markii aannu togga hoose ku soo dhacnayna hore ayaannu si degdeg ah ugu sii soconnay, maadaama ay maalintu isa sii guraysay oo aannaan doonayn in Habar Awashu na ga hor cid gasho.

Abbaarihii duhurka ayaannu ka gudubnay Togga Erer. Waa ilaa 100 yaardi ballacu, biyo yar oo xalliiban, qabow, macaan oo wiriqo ku dahaaranyahay ah ayaa ciidda badankeeda dul qulqulaya. Sida aan dhulwadeennadayda ka xigtay, marinkiisu sida buuraha ayuu koofurta iyo xagga Webe[29] Ogaadeen qabtaa. Si ay ahaata ba se, cidina iga ma qancin kuurkayga ku saabsanaa marinka biyamareenka kaliya ee aan xillina gurin ee ka jira inta u dhaxaysa xeebta iyo Harar. Togga hoose oo gaan haruur ah dabayshu ruxayso waxaannu ugu tagnay beeralay Oromo ciiddaa ka badan ah oo magaalada ka soo gaddoomay, iyagoo hayaayado cusub iyo qulco maran oo ay burcad, subag iyo caano suuqa ku geeyeen sita. Dhammaan waxay aad u la yaabeen Turkiga oo ay sheekooyin argagax fara badan leh ka maqleen. Haddii aannu bilownnay in aannu dallacaad kale sii korno, waxaa soo muuqday Harari darajo sare leh oo baqal si wanaagsan loo heenseeyay fuushan, 7 gacanyarana ay qulco dhaansan iyo qarbadyo badar ah u sidaan. Wuxuu ahaa oday waji iyo gar cad oo ku labbisan dhar wanaagsan iyo duub midabku xay cad oo farqo casaan leh ah yahay. Wax gaashaan ah ma aanu sidan, waxaa se garabka bidix uga laalaadday seef Xabashi ballaaran. Salaan diirran ayaannu is dhaafsannay, aniga oo oommanaana wuxuu nin iigu diray in uu weel biyo ka soo buuxsho.

---

[29] Webi Shabeelle. *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Buurta marka kala bar kor loo fuulo, waxaa ka muuqday 200 oo sac oo Geri leeyahay, se ballanfurayaashii Hababr Awal ma joogin oo hore ayay u sii degdegeen. Figta kore waxaa laga tilmaansaday degmada Elaoda oo waayadii hore ahaan jirtay meel barwaaqo ah oo Garaad Aadan xukumo.

Siddeeddii saac ee maalinnimo ayaannu ku soo dhacnay meel dhuubad xayndaab leh ah oo aannu daqiiqado ku nasannay, meel u dhow geed dallad ah oo hoostiisa ay dumar ku iibinayaan subag iyo cudbi. Ilaa laba mayl meel u jirta figta buurta ayay magaaladii safarkaygani ku ekaa ahayd ku tiil. Waa saf dheer oo madmadow aadna uga duwan magaalooyinka nuuradda cad leh ee Bariga. Muuqaalku, haddii adduunyo laga hadlayo, wuxuu lahaa niyadjab. Wax la sheego oo aan ka ahayn laba minnaaradood oo aan xallad u qotomin ma lahayn. Nabee in badani aad ayay uga shallayn lahaayeen in saddex ruux lagu halligo, si guul aan naf lahayn loo gaaro, se intii isku dayday oo dhan midkoodna ku ma guulaysan in uu galo dhagaxyadaa meesha tuban. Dalmarka qummani, gacaliye L[umsdenoow], waa uu iska garanayaa raynrayntayda, in kasta oo labadaydii weheliye ay daymooyin ashqaraar ah isla dhex mareen.

Inta baqalaheenni cirbaha ku sii dhuffanay ayaannu hore ruclayn dheer u sii daynnay, ilaa Saciid Waal na joojiyay, si aan Faataxo ugu akhrinno Aw Cumar Siyaad iyo Raxmaan, laba wali oo waawaynoo ku hoos aasan cutub geedo ah waddada dhinaceeda. Ciidda waddada labadeeda dhinac taallaa waa bacrin guduudan. Beeraha oo ay gaar ka hayaan madaxyo lo'aad la qallajiyay oo ulo gaagaaban la suray waxaa ka muuqanayay gaaman moxog, liin iyo rummaan ah oo ay u dhexeeyaan beero qaxwe, sacfaraan garac ah iyo Qaadka loo bogay ay ka baxaan. Meel ilaa nus mayl bariga kaga aaddan magaalada waxaa ka muuqda gubadka Jalalah ama Biyaha Bunka, halkaa oo dadkii ka gudbayay ayan ka hor istaagin weheliyeyaashaydu in ay ku maydhaan. Intii ay go'yaasha xiranayeen anigu jidka dhinaciisa ayaan ku nastay oo magaalada sawirtay. Hawlahaa markii meel lagu ogaaday ayaannu waddadeennii oo u ekayd dhufays dhagxaan iyo tiin dhaadheer lagu xeeray kor u sii raacnay. Jidkani wuxuu kor ugu baxaa bannaan fidsan. Dhanka midig waxaa ah beeraha haruurka oo ilaa gidaarka magaalada fidsan, dhanka bidix waa tuur qabuuro qaab daran ah, hortayadna waxaa ah difaacyadii madoobaa ee Harar oo kooxo degaanka ahi qaar albaabka wayn agtiisa taagtaaganyihiin, qaarna qaad la fadhiyo burburka qabrigii Aw Cabdalla.

Waxaannu nimi 9 saac oo galabnimo, kadib markii shan saacadood oo la doonayay in lagu jaro 20 mayl oo toos ah aannu soo fuushanayn.[30] Albaabkii markaan nimid ayuu Saciid Waal abbaaray waardiye darajadiisa lagu yaqiin ushiisa dheer oo ka dalbaday in aannu Cadan ka nimi oo uu Amiirka salaan naga gaarsiiyo, aannuna codsanaynno in uu na qaabbilo. Markii uu hawshii u cararayay ayaannu fariisannay geed gacaaran hoosti, halkaa oo na la dhugdhugtay, nala kuunyay, oo ay su'aalo na waydiiyeen rag iyo dumarba, siiba hablaha qurqurxoon. Saddexdii Habar Awal hadda ayay noo yimaadeen oo na wayddiiyeen waxa aan u ogaysiin waynnay ulajeeddadayadii ahayd in aannu magaalada galno. Markaan waxay maraysay" is xaniinyo taabasho", wax jawaab ahna u ma aannaan quurin in aan u celinno.

[30] Marka laga qiyaas qaato Saylac ilaa Gudingaras waa 19 mayl, ilaa Quraanyaale waa 8 mayl, ilaa Cadaad waa 25 mayl, ilaa Damal waa 11 mayl, ilaa Ceel Carmo waa 11 mayl, ilaa Jiyaf waa 10 mayl, ilaa Xaliimaale waa 7 mayl, ilaa Awbuube 21 mayl, ilaa Kooraley waa 25 mayl, ilaa Hararna waa 65 mayl. Isku celcelisku waa 200 oo mayl. [B. en.].


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

La soco cutubka xiga.

Mahadsanidin

Tarjumo & Tifaftir Boodhari Warsame
Email: Bodhari.warsame@gmail.com

---

*Boodhari waa qoraa tarjumay ama gacanta ku haya buuggaag badan oo qiimo taariikheed ku leh Soomaaliya. Waxa uuna si joogto ah qoraaladiisa ugu soo ban dhigaa degelka WardheerNews*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**